

HUMAN RIGHTS WATCH

# “Halkaan, Kufsigu waa Iska Caadi”

## Shan Qodob oo Loo Qorsheeyay Sidii Lagu Xaddidi Lahaa Tacaddiyada Galmada ee Ka Dhaca Soomaaliya

# “Halkan, Kufsigu waa iska Caadi”

## Shan Qodob oo Loo Qorsheeyay Sidii Lagu Xaddidi Lahaa Tacaddiyada Galmada ee Ka Dhaca Soomaaliya

## Soo Koobid

Maryam, oo ah 37 jir garoob ah, ayaa waxay u sheegtay hay’adda Human Rights Watch in habeenkii ka horeeyay markii ay wareysiga siinaysay hay’adda ay maqlaysay haweeney lagu soo weeraray xerada ay ku nool yihiin barakacayaasha ee ku taal caasimmada Soomaaliya ee Muqdisho, halkaa oo ay kula nooshahay lixdeeda caruurta ah. Qisadaas ayaa soo xasuusisay xanuunkii maskaxeed ee laf ahaanteeda soo maray mar la kufsaday. Maryam ayaa waxay sheegtay in kufsiga uu wax caadi ah ka noqday xerada barakacayaasha ee ku taal degmada Wadajir ee caasimmada, iyadoo xaalada haweenkana ay ka sii daraysay tan iyo markii iyada lafteeda lagu kufsaday halkaa 2012-ka. “Xeradeena marka aan aragno qof waan isa salaami jirnay, oo waxaan dhihi jirnay “Haye, sidee tahay.’ Haddase markaan is aragno waxaan is waydiinaa, ‘Maanta malagu kufsaday?’”

Maryam waxay sheegtay in markii ugu horeysay ee la kufsaday ay aheyd xaamilo ama uur shan bilood ah waxaana ay jiiftay aqalkeeda ku yaal degmada Wadajir. “Dhamaan afarta ninba hal hal ayey ii kufsadeen marwalbana mid ka mid ah ayaa ilaalo ku jiray banaanka. Waxaan la harjadayay ninkii ugu dambeeyay wuxuuna igu dhuftay beynaada ama toori ku xirneyd qorigiisa. Waan qeylinayay balse qof inuu icaawiyo usoo baxay ma uusan jirin.”

Maalintii xigtay, maamulaha xerada “horjoogaha xerada” ayaa soo booqday kaddib markii sheekada kufisga ay ku faaftay xerada oo dhan. Wuxuu geeyay saldhiga booliska halkaa oo ay ka warbixisay in mid ka mid ah dadkii kufsaday uu xirnaa dareeska ciidanka booliska.

“Kaddibna waxaa iga yimid dhiig badan kaasoo ka imanayay xubinteyda taranka…. Waxay ii sheegeen in aan guriga aado oo aan iska tirtiro dhiigga. Inta aanan tegin ka hor, waxay I fareen in ay tahay in aan tirtiro goobta uu dhiiggu ku daatay. Waan fariistay, waxayna isiiyeen xaaqin kaddibna waan nadiifiyay goobtii.” Mar dambe kuma aanay laaban saldhiga booliska si ay u sii wado dacwadeeda. Waxa ay ka baqanaysay in dambiilayaashii ay ka daba yimaadaan oo ay “wax kasii daran ay ku sameeyaan.” Waxyar kaddib, Maryam waa ay dilantay. Saddex bilood kaddibna, markale ayaa xilli habeen ah teendhadeeda waxaa ku dhex xoogay koox kale oo dambiilayaal ah.

Tacaddiyada galmada ayaa caadi ka noqday inta badan Soomaaliya. Labaatan sano oo dagaal sokeeye iyo dowladd la'aan ah ayaa waxay dhalisay in shacab badan oo barakacayaal ah iyo kuwo kale ay halis u galaan tacaddiyo dhanka galmada ah. Isla markaana waxaa burburay hay'adihii qaran ee loogu talagalay in ay ilaaliyaan dadkaasi halista ku jira. Kooxo hubeysan oo ay ku jiraan xubno ka tirsan ciidammada ammaanka qaranka, oo si cabsi la'aan ah u howlgalaya, ayaa geysta tacaddiyo galmo, kufsi, garaac, toogasho ama dil, iyo tooriyeen ay u geystaan haween iyo gabdho ama inamo ku nool xeryaha barakacayaasha, gaar ahaan marka ay aadayaan suuqyada, banaanada ama marka ay qoryo soo guranayaan. Xubnaha ka tirsan bulshooyinka mudada dheer la faquuqayay ee laga tirada badan yahay ayaa gaar ahaan halis ku jira.

Qaramada Midoobay ayaa ku warrantay in 800 kiis oo isugu jira tacaddiyo galmo iyo kuwa xaga jinsiga ah ay ka dhaceen magaalada Muqdisho oo kaliya lixdii bilood ee ugu horeysay sandkii 2013-ka. Tirida rasmiga ah waxa ay u dhawdahay in ay aad uga badan tahay. Dhibbanayaal badan ayaan soo gudbin dacwado kufsi iyo tacaddiyada galmada sababtoo ah waxa aanay kalsooni ku qabin nidaamka cadaaladda, kamana warqabaan adeegyada caafimaad iyo kuwa cadaaladda ama maba ay gaari karaan, waxa ayna ka cabsi qabaan aargoosi iyo ceebeyn haddii ay soo sheegaan kufsiga. Sida ay sheegtay hay'adda Qaramada Midoobay u qaabilsan Caruurta ee (UNICEF), ku dhawaad saddex meelood meel dhibanayaasha loo gaystay tacaddiyada galmada ee Soomaaliya ayaa ah caruur.

Labaatan sano oo dowlad la'aan iyo dagaallo hubaysan ah kaddib, ayaa adeegyada caafimaad iyo nidaamka caddaaladda ee Soomaaliya, oo ay ku jiraan booliska iyo maxkamadaha, ay aad u hooseeyaan oo taageero iyo caawinba aysan siin karayn dhibanayaasha ay saameysay tacaddiyada galmada. Taas ayaa sababtay, in haweenka iyo gabdhaha yaryar ay wajahaan waxa uu khabiirka madaxa banaan ee Qaramada Midoobay u qaabilsan xaquuqda aadanaha ee Soomaaliya uu ugu yeeray "dhibaateyn laba waji leh" — dhibaatada koowaad waa kufsiga ama tacaddiga gamada laf ahaanteeda, midda labaadna waa ka gaabinta mas'uuliyiintu ka gaabiyeen in ay siiyaan dhibanayaasha cadaalad wax ku'ool ah ama taageero caafimaad iyo mid bulshaba.

Dowladda Federaalka Soomaaliya, oo la caleema saaray bishii August, 2012-kii, balse si weyn ugu tiirsan caawimaad caalami ah iyo taageero militari oo ay ka hesho Howgalka Nabad Ilaalinta ee Midowga Afrika ee AMISOM, oo maamusha qeyb yar oo dalka ah oo ay ku jirto nawaaxiga caasimmada Muqdisho, ayaa qirtay in ay jirto dhibaato la xiriirta

tacaddiyo dhanka galmada ah. Bishii May ee sandkii 2013-ka, dowladda ayaa waxay si wadajir ah ula saxiixday ergayga gaarka ah ee Qaramada Midoobay u qaabilsan tacaddiyada galmada ee ka dhaca wadammada ay colaaduhu ka jiraan heshiis ah in ay arrinta wax uga qabato "si ballaran oo ahmiyad weyn leh." Sikastaba ha ahaatee, weli ma aysan muujin awoodda ay u leedahay in ay si wax ku ool ah wax uga qabato ugana ilaaliso ciidammada ammaanka iyo kuwa kalaba in aanay geysan tacaddiyo galmo ama in ay cadaaladda horkeenaan dambiilayaasha geysta falalkaas.

Warbixintan, Human Rights Watch waxay wax ka qortay dhibaatooyinka la xiriira tacaddiyada galmada ee loo geystay haweenka tan iyo 2012-kii markii la caleema saaray Dowladda Federaalka Soomaaliya ee cusub. Warbixintu waxa ay tabinaysaa dhibaatooyinka haweenka ku soo gaaray gudaha Muqdisho iyo degmooyinka ku xeeran Banaadir, goobahaas oo ah meelo ay dowladdu gacanta ku hayso oo dowladda iyo hay'adaha caalimiga ah ay si weyn ugu sameynayaan maal galin ballaaran si ay u wanaajiyaan ammniga oo ay dib ugu dhisaan hay'adaha dowladda oo ay kamid yihiin garsoorka iyo adeegyada caafimaadka.

Inkastoo markii uu awooda la wareegayay Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud uu ballan qaaday in uu mudnaanta siin doono ammaanka iyo cadaaladda, ayaa dhab ahaantii wax yar oo kaliya laga qabtay in laga hortago dhibaatooyinka kufsiga iyo tacaddiyada galmada ee loo geysto haweenka iyo gabdhaha, gaar ahaan bulshooyinka liita ee barakacayaasha ah.

Warbixintu waxay soo bandhigaysaa shan qodob oo looga gol leeyahay in lagu caawiyo dowladda, wadammada deeqda bixiya, iyo kuwa kale si ay u sameeyaan istiraatiijiyad qaran oo dhamaystiran oo lagu yareenayo tacaddiyada galmada, laguna siinayo caawimaad degdeg ah dadka ay saameysay arrintaas iyo in la sameeyo hab gaara waqti dheer oo lagu soo afjarayo gaboodfallada.

Ka hortagid toos ah. Marka hore, mas'uuliyiinta Soomaaliya iyo ciidammada ammniga waa in ay qaadaan dhammaan tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah sidii loo ilaalin lahaa ammniga haweenka, gaar ahaan xeryaha barakacayaasha ee ku yaal Muqdisho iyo nawaaxigeeda halkaasoo ay ku wajahaan halis weyn oo kufsi ah. Dowladda waa in ay xaqiijisaa in ay geyso tiro ciidan boolis ah oo tababaran oo hawl kar ah, oo ay kamid yihiin askar dumar ah si ay u sugaan ammaanka shacabka barakacayaasha ah. Waana in

dowladdu siisaa militariga iyo booliska amarro cadcad oo sheegayo in dowladdu ay fulineyso siyaasad “aanay ugu dulqaadanayn” tacaddiyada galmada. Sidoo kale dowladda waa in ay taageerto sameynta aqallo gaar ah iyo meelo ammaan u ah haweenka iyo gabdhaha halista ugu jira tacaddiyada.

Adeegyo caafimaad oo degdeg ah. Marka labaad, mas’uuliyiintu waa in ay taaba galiyaan tallaabooyin lagu sameynayo adeegyo caafimaad oo dhameystiran oo isku dhaf ah, oo uu ku jiro gurmad caafimaad oo degdeg ah, oo loo sameeyo dadka ay waxyeeladu ka soo gaartay tacaddiyada galmada iyo kuwa jinsiga ah, oo ay ku jiraan kuwa ku nool xeryaha barakacayaasha. Dowladdu waa in ay xaqiijisaa in adeegyada caafimaad iyo kuwa bulshaba ay noqdaan kuwo ka caawinaya haweenka iyo gabdhaha ka soo kabanaya gaboodfallada dhanka jirka, maskaxda, bulsho, dhaqaale, iyo taageero dhinaca caafimaadka ah. Goobaha daryeelka caafimaadka iyo kuwa bixiya adeega bulshada waa in ay helaan tababaro gaar ah si ay daryeel, daawo, iyo taageeraba u siiyaan dadka waaweyn iyo caruurta waxyeelada ay kasoo gaareen tacaddiyada galmada.

Helitaan caddaalad. Marka saddexaad, mas’uuliyiintu waa in ay xaqiijiyaan in dadka waxyeeladu ka soo gaartay tacaddiyada galmada ay helaan caddaalad iyadoo la sameynayo hannaan caddaaladeed oo gaarsiisan heerarka caalamiga ah. Isbadal lagu sameeyo waaxda caddaalada waxay u baahan tahay in si wax ku ool ah ay wax uga qabato tacaddiyada ka dhanka ah haweenka qorshahana lagu daro xanibaadyada ay wajahaan haweenka iyo gabdhaha markii ay raadinayaan caddaalad, oo ay kujiraan faquuqid, dhibaateyn, qarash, iyo deegaanada qaar oo aanay gali karin. Booliska waa in la siiyaa tababar wanaagsan si ay wax uga qabtaan una baaraan dambiyada la xiriira tacaddiyada galmada. Iyadoo mudnaanta la siinayo, ayaa dowladda waxaa laga doonayaa in ay qaado dhamaan tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah in la xaqiijiyo in aan laga aargoosan dhibanayaasha soo sheegay in la kufsaday, sida ka dhacdayba saddex kiis oo waa weyn oo lasoo tabiyay 2013-kii. Mas’uuliyiintu waa in si degdeg ah oo dhexdhexaad ah ay u baaraan ashtakooyinka la xiriira tacaddiyada galmada oo si haboonna ay u maxkamadeeyaan kuwa mas’uulka ka ah, oo ay ka mid yihiin ciidammada ammniga.

Isbadel lagu sameeyo sharciga iyo hab dhaqanka. Marka afraad, dowladdu waa in ay sameysaa oo ay dhaqan galisaa shuruuc mamnuucaysa dhammaan qeybaha kala duwan ee tacaddiyada galmada ee loo geysto haweenka; iyadoo la sameynayo hannaan ka hortag ah, iyo ilaalin; sameyn daryeel, daaweyn, iyo taageero la siiyo dadka ay waxyeeladu

gaartay; iyo in lagu fuliyo ciqaab ku filan dadka lagu xukumo dambiyadaas. Mas'uuliyiintu waa in ay dib u eegid ku sameeyaan shuruucda iyo hannaanka haatan dagsan, gaar ahaan kuwa xeer ciqaabeedka oo waa in ay qoraan ama dajiyaan qorshe qaran oo xagga jinsiga ah, si loo ogaado loona awdo dalduleelada ku aaddan sidii haweenka looga ilaalin lahaa tacaddiyada dhanka jinsiga ah.

Horumarinta sinaanshaha haweenka. Marka shanaad, si ay qeyb uga noqoto ka go'naashaha Dowladda Federalka ee Soomaaliya ee ladagaalanka tacaddiyada ka dhanka ah haweenka, waa inay horumarisaa sinaanshaha jinsiga iyadoo isticmaaleysa horumarinta waxbarashada, sinaanshaha haweenka ee dhinaca siyaasadda, bulshada, iyo dhaqaalaha iyo ka qeybgalka haweenka ee siyaasada.

Sharciga xuquuqda aadanaha ee caalamiga ah wuxuu farayaa dowladda taagta daran ee Soomaaliya in ay tixgaliso xuquuqda sharafta jirka bini'aadamka, madax banaanida sodcaalka, iyo ammniga shakhsiga, iyo in aan la midab takoorin, taasoo ay ka mid tahay sameynta tallaabooyin ku habboon sidii lagu ciribtiri lahaa dambiyada galmada iyo kuwa jinsiga. Dowladda Federaalka Soomaaliya waa in ay qaadaa dhammaan tallaabooyinka muhiimanka ah si ay u ilaaliso xuquuqdaas iyadoo sameynaysa baaritaan si habboona u maxkamadeynaysa ashkhaasta gaarka ah iyo howlwadeenada dowladda ee jabiyaa shuruucdaas. In lasoo afjaro xasaanada xoojinaysa in ay dhacaan gaboodfallo mustaqbalka ayaa waxay u baahan tahay hoggaan sare oo dowladda ah. Haddii lagu guuldareysto in arrimahaas wax laga qabtana waxay horseedi doontaa in haween iyo gabdho badan oo Soomaali ah loo geysto tacaddiyo galmo iyo uur ku taalo maskaxeed oo laga hortagi karay taasoo aan waxba u kordhinayn taageerada bulshada rayidka ah ee ay ku dhex leedahay Soomaalida dowladda taagta daran ee sida weyn ugu tiirsan militariga ajaanibta ah iyo taageerada dhaqaale.

Deeqbixiyayaasha caalamiga ah ayaa ku caddaadiyay dowladda Federaalka Soomaaliya, in ay mudnaanta siiso xuquuqda haweenka, taasoo ku jirtay heshiiskii Soomaaliya ay saxiixday bishii Sitembar ee 2013-ka. Deeqbixiyayaashu waa in ay caddeeyaan in taageerada hannaanka dhaw iyo midka fog ee wax looga qabanayo tacaddiyada galmada ee ka dhanka ah haweeenka in uu muhiim u yahay horumarka Soomaaliya.

# 1. Horumarinta Istiraatiijiyadda Kahortaga

## Tallaabooyinka kahortaga mustaqbalka dhaw:

- Waa in la diyaariyaa ciidammo isku dhaf ah oo howl kar ah oo sameeya roondo oo ka kooban boolis tababaran iyo dad matala bulshada ku nool xeryaha barakacayaasha, gaar ahaan habeenkii, si looga hortago waxyeelada iyo si loo ogaado haweenka ay dhibaatadu soo gaartay si loo siiyo adeegyo;
- Waa in la sameeyaa adeegyo si loo yareeyo baahida haweenka iyo gabdhaha ku nool xeryaha barakacayaasha ay u qabaan in ay qabtaan howlo khatar sare galin kara naftooda sida in ay meelo fogfog u aadan qoryo gurasho iyo biyo dhaamin, waana in la sameeyaa meelo ammaan ah oo ay biyaha ka heli karaan.

## Tallaabooyinka kahortagga mustaqbalka dhexe:

- Waa in la hormariyaa ilaalinta guud iyadoo laga dhex dhisayo aqalada goobo ammaanka lagala socdo iyo meelo bannaan oo ammaan ah oo ku dhexyaal xeryaha oo loo sameeyo haweenka iyo gabdhaha halista ugu jiro waxyeelada iyo kuwa horay loo waxyeeleeyay. Waa in xeryaha lagu sameeyaa nal galin, musqulo leh qufulo, iyo in xerada loo sameeyo deyr ammaan ah;
- Waa in la shaqaalaysiiyaa xiriiriyayaal ka shaqeeya badqabka oo ka tirsan bulshada ku nool xeryaha barakacayaasha si ay u caawiyaan haweenka iyo gabdhaha oo ay diyaariyaan in ay koox koox u socdaan markii ay adeeg doonanayaan ama marka ay ka baxayaan xerada oo ay shaqo ama dugsi aadayaan;
- Waa in la xaqiijiyaa in tiro ku filan oo boolis tababaran oo howl kar ah oo ay ku jiraan askar haween ah, la geeyo xeryaha si ay u ilaaliyaan haweenka iyo gabdhaha ku nool xeryaha barakacayaasha iyo goobaha kale ee bulshada.

## Tallaabooyinka kahortagga mustaqbalka fog:

- Waa in la sameeyaa olole dhanka waxbarashada iyo xogta ah oo ku saabsan tacaddiyada ka dhanka ah haweenka si loo badalo dabeecada ragga iyo haweenku ka aaminsan yihiin dowrkooda iyo heerka ay bulshada kaga jiraan;

- Waa in la sameeyaa olole bulshada loogu gudbiyo fariimo iyo wacyigalin loogu sheegayo in dadka ay waxyeelada ka soo gaartay tacaddiyada galmada in ay jiraan adeegyo diyaar ah iyo hannaan ay ku sheegi karaan wixii ku dhacay.

# 2. Horumarinta helitaanka adeegyo caafimaad oo degdeg ah

## Tallaabooyinka mustaqbalka dhexe:

- Waa in la sameeyaa olole lagu gudbinayo fariimo iyadoo la isticmaalayo taallbooyin iyo raadiyaha si loo kordhiyo wacyigalinta ku saabsan dhibaatooyinka waaweyn ee tacaddiyada galmada ee ka dhaca Soomaaliya, taasi waxay caawinaysaa in la yareeyo ceebeynta;

## Tallaabooyinka Mustaqbalka fog:

- Waa in la xaqiijiyaa in adeegyada caafimaad ay ahaadaan adeegyo dhameystiran oo ay kamid yihiin kuwa jirka, maskaxda, bulshada, dhaqaalaha iyo adeegyada caafimaad ee la siiyo haweenka iyo gabdhaha ka soo kabanaya waxyeellooyinka; waana in la sameeyaa nidaamyo lagu kalsoonaan karo, waana in laga dhisaa rugo caafimaad meelaha aadka halista ugu jira in uu kufsi ka dhaco, sida xeryaha waaweyn ama kuwa meelaha goonida ah ku yaal ee barakacayaasha, taasi waxa ay suura galineysaa in si fudud loo geeyo oo daaweyn degdeg ah la siiyo haweenka ay saameeyeen tacaddiyada galmada.
- Waa in la xaqiijiyaa in dhammaan isbitaalada Muqdisho iyo deegaanada u dhaw in loo sameeyo qalab caafimaad si loogu daweeyo dadka la kufsaday qaab waafaqsan heerarka ay dajisay hay'adda Caafimaaka Adduunka ee (WHO), waana in la xaqiijiyaa in dhammaan rugaha caafimaad ay leeyihiin nidaamka loogu tala galay in lagula tacaallo tacaddiyada kufsiga oo ay ka mid tahay qalabka lagu daaweeyo dadka markaa lakufsaday. Adeeyada dhammaan waa in ay fuliyaan shaqaale tababaran oo sameyn kara daaweyn ballaaran oo lagu kalsoonaan karo, waana in ay bixin karaan taageero xagga maskaxda ah. Haddii rugaha caafimaad aanay haysan adeegyo caafimaad, waa in ay leeyihiin nidaamyo ay ugu gudbiyaan dadka waxyeeloobay meelo kale oo ay ka heli karaan adeegyo caafimaad oo ay ku kalsoonaan karaan;
- Waa in loo sameeyaa tababarro khaas ah dadka bixiya adeegayada caafimaadka iyo kuwa bulshada si loo xaqiijiyo daryeelka, daweynta iyo taageeridda haweenka

iyo caruurta waxyeeloobay. Tababarradu waa in ay isugu jiraan kuwa la siiyo ashkhaas gaar ah iyo kuwa la siiyo xubno ka tirsan bulshada markii loo baahdo;

- Waa in la xaqiijiyaa in dadweynuhu helo xog ku saabsan cawaaqibka dhinaca sharciga ah iyo kuwa jirka ah ee la xiriira tacaddiyada kufsiga iyo sida dadka waxyeellobay ay u heli karaan adeegyo bilaash ah oo shaqeeynaya.

# 3. Xaqiijinta Helitaanka Caddaalada

## Tallaabooyinka mustaqbalka dhaw:

- Waa in lagu amro booliska in ay wanaajiyaan xiriirka ay la leeyihiin bulshooyinka barakacayaasha ah iyagoo sameynaya roondooyin dheeraad ah, una qabanaya bulshooyinka shirar, lana xiriiraya dadka bixiya adeegyada si ay ugu boorriyaan haweenka iyo gabdhaha in ay soo sheegaan tacaddiyada galmada;
- Waa in la dajiyaa qorshe "dulqaad la'aan ah" oo ka dhan ah ciidammada booliska ee lagu helaa inuu geysteen tacaddi galmo;
- Waa in la sameeyaa nidaamyo lagu ilaalinayo siraha dadka soo sheega tacaddiyada galmo marka ay boolisku baaritaan sameynayaan;
- Waa in amarro cadcad la siiyaa dhamaan xubnaha ciidammada qalabka sida iyo booliska geysta kufsiga ama sameeya tacaddiyo kale ee dhanka galmada ah oo loo sheego in si degdeg ah loo baarayo lana maxkamadeyn doono;
- Waa in la baaraa lana maxkamadeeyaa tacaddiyada galmada ee la soo sheegay oo ay sameeyeen xubnaha ka tirsan ciidammada qalabka sida iyo kuwa booliska, oo shaqo joojin lagu sameeyaa haddii lagu helo dambiyadaa.

## Tallaabooyinka Mmustaqbalka dhexe:

- Waa in la sameeyaa olole xagga waxbarashada iyo xogta ah oo loogu sheegayo tacaddiyada galmada booliska, maxkammadaha militariga iyo mas'uuliyiinta kale;
- Waa in la tababaraa dhammaan dadka fuliya sharciga oo ay ka mid yihiin booliska iyo xeer ilaaliyayaasha si ay si dhaqso ah ugu baaraan kiisaska galmada tacaddiyada dhinaca jinsiga ah;
- Waa in la shaqaaleeyaa haween boolis ah oo dheeraad ah iyo shaqaallo kale oo haween ah oo ka shaqeeya saldhigyada booliska;
- Waa in la kala soocaa xubnaha militariga marka la shaqaaleynayo oo aan lagu darin kuwa ku xad gudba xuquuqda aadanaha oo ay ka mid tahay tacaddiyada galmada.

## Tallaabooyinka mustaqbalka fog:

- Waa in la xaqiijiyaa in dhammaan shaqaalaha cusub iyo kuwii horaba la siiyo tababarro la xiriira xuquuqda aadanaha oo ay ka mid yihiin tababarro ku saabsan

noocyada kala duwan ee tacaddiyada galmada iyo sida looga jawaab celiyo soo sheegidda tacaddiyada galmada;

- Waa in la sameeyaa nidaam maxkamadeed oo lagu ilaalinayo siraha ama asturnaanta dhibanayaasha, sida in aan loo ogalaan dadweynaha iyo saxaafadda in ay dhageystaan dacwooyinka la xiriira tacaddiyada galmada;
- Waa in la taageero tababarrada haweenka abuukaatayaasha ah, xeer ilaaliyayasha iyo sharci yaqaannada, waana in la siiyaa garsoorka tababar la xiriira dhinaca jinsiga.
- Waa in dadweynaha loo soo bandhigo xog ku saabsan maxkamadeynta iyo xukumidda kiisaska la xiriira galmada iyo tacaddiyada jinsiga.
- Waa in sida ugu dhoqsiyaha badan laga wareejiyaa maxkamadaha militariga dhammaan kiisaska lagu soo eedeeyay in ay sameeyeen dad shacab ah oo la geeyaa maxkamadaha madaniga ah;
- Waa in la sameeyaa tallaabooyin ilaalo oo ay ka mid yihiin barnaamijyo ilaalo iyo taageero xagga maskaxda ah oo loo sameynayo dhibanayaasha iyo dadka marqaatiga ah oo nabad galyadooda iyo xaaladooda maskaxeed ay halista ku jirto ka hor iyo kaddib dhageysiga dacwadda. Arinkan waxaa qeyb ka ah dib u dajin loo sameynayo dadkaa balse waa in aanay ku koobnaan dib u dajin kaliya.

# 4. Isbadel lagu sameeyo dhanka Sharciga iyo siyaasada

## Mustaqbalka dhaw iyo kan fogba dowladdu waa in ay:

- Meelmarisaa oo ay xoojisaa shuruuc mamnuucaysa dhammaan noocyada tacaddiyada ka dhanka ah haweenka oo ay ku jiraan ka hortagga, ilaalinta, xanaaneynta, daweynta iyo taakuleynta, iyo daweynta dadka ay waxyeelada soo gaartay, iyadoo sidoo kale ciqaab ku filan la marsiinayo kuwa lagu helo dambiyada;
- Dib u eegid ku sameysaa sharciyada jira, gaar ahaan xeerka ciqaabta iyo qabyo qoraalka hannaanka qaran ee jinsiga, si loo awdo daldaloolada ku aaddan ka ilaalinta haweenka dhibaatooyinka jinsiga ku salaysan;
- Wax ka badashaa xeerka ciqaabta kaasi oo ka dhigaya xadgudubyada galmada “gaf ka dhan ah nasabka iyo galmo aan raali laga aheyn” halkii ay ka ahaan laheyd xadgudub loo geystay sharafta jireed ee qofka;
- Laasho qodobka 443-aad ee xeerka ciqaabta, kaasoo ciqaab aan weyneyn saaraya dadka lagu helo inay galeen dambiyada loogu yeero dambiyo ka dhan ah sharafta;
- Dib u eegid ku sameyso xeerka ciqaabta iyo sharciyada kale si loo xaqiijiyo in dhammaan noocyada xadgudubyada galmada la xiriira si waafaqsan loogu maxkamadeeyo looguna ciqaabo kuwa dambigaas lagu helo;
- Wax ka badashaa qabyo qoraalka hannaanka qaran ee jinsiga si ay mudnaan u siiso baabi’inta dhamaan noocyada faquuqa ee jinsiga ku saleysan, oo ay kujiraan dhammaan noocyada tacaddiyada ka dhanka ah haweenka; iyo
- Saxiixdo xeerarka muhiimka ah ee xuquuqda bini’aadamka, oo ay ku jiraan xeerka baabi’inta dhamaan noocyada faquuqa ee haweenka ka dhanka ah ee loo soo gaabiyo (CEDAW) iyo xeerka xaquuqda caruurta ee loo soo gaabiyo (CRC).

# 5. Sinnaanta Haweenka

## Tallaabooyinka Mustaqbalka dhexe iyo mustaqbalka fog:

- Taageerida barnaamijyada lagu taakuleeyo haweenka ay waxyeeladu ka soo gaartay tacaddiyada galmada iyo jinsiga ku saleysan si ay noloshooda dib ugu dhistaan, iyagoo laga caawinayo in ay helaan hooy, shaqooyin, tababar xirfadeed, ama in laga diiwaan galiyo dugsiyada (ama fursado waxbarasho);
- Taageerida barnaamijyada lagu horumarinayo siyaasada, bulshada, iyo sinnaanta dhaqaalaha ee haweenka;
- Xaqiijinta in haweenka ay u awoodaan qaab sharci ayna u fulin karaan oo ay si siman uga qeyb gali karaan hannaanka siyaasada;
- Horumarinta ka qeybgalka siyaasada ee haweenka iyadoo la dhisayo awooda ay musharaxiinta haweenka leeyihiin loona sii marayo qaabab ay ka mid yihiin maareynta ololaha ama tababar dhanka hoggaanka;
- Taageerida barnaamijyada wax lagu barayo codbixiyayaasha ee lagu beegsanayo waxbarashada iyo xogta ay u baahan yihiin haweenka codbixiyayaasha ah;
- Taageerida waxbarida gabdhaha iyadoo la xakameynayo dhaqanka heyb sooca ah ee ku aaddan waxbarida gabdhaha iyadoo la sii marayo olole bulshada lagu wacyigalinayo;
- Xaqiijinta xuquuqda ay haweenku u leeyihiin in ay hanti yeeshaan, dhaxalka wax ku yeeshaan, mushaar ragga la mid ah ay shaqada ku qaataan, ayna ku shaqeeyaan goob wanaagsan oo badqabta;
- Xaqiijinta in hannaan kasta oo lagu dhisayo dhaqaalaha dagaalka kaddib uu horumariyo sinnaanta jinsiga uuna diirada saaro haweenka ku jira shaqooyinka dowladda iyo kuwa gaarka ahba;
- In kor loo qaado wacyigalinta bulshada si loo joojiyo tacaddiyada ka dhanka ah haweenka iyo gabdhaha; iyo
- In la taageero ururada bulshada rayidka ah ee difaaca horumariyana xuquuqda haweenka, oo ay ku jiraan kuwa matalaya difaacayaasha xaquuqda haweenka.



*Faahfaahin ku saabsan masawirka:*
*Haweeney Soomaali ah oo kaligeed lugeyneysa bartamaha Muqdisho.*

*©2013 Samer Muscati/Human Rights Watch*

**hrw.org**